

Diabetes CONNECT



Waa maxay Diabetes Connect (Isku xidhka Sonkorowga/macaanka)?

Diabetes Connect waa barnaamij cusub oo taageeraya dadka qaba nooca 2aad ee sonkorowga si ay u maareeyaan caafimaadkooda iyo badqabkooda. Waxaa la bixiyaa adeegyo la soo xulay oo caafimaadka bulshada kuwaas oo ka howlgala magaalo-madaxda iyo tuulooyinka Victoria.

Maxaan ka helayaa barnaamijka?

- Waxaad la shaqayn doontaa isku-duwe daryeel si loo go'aamiyo taageerada iyo adeegyada aad u baahan tahay si aad u maamusho caafimaadkaaga iyo ladnaantaada.
- Qaar ka mid ah adeegyada laga yaabo inaad hesho waa:

Caafimaadka isbahaysiga (Allied health) sida:

- Barashada sonkorowga/macaanka
- Xanuunada cagaha
- Aqoonta raashinka
- Daaweynta jireed (physiotherapy)

Adeegyada bulshada sida:

- daryeelka, sharciga iyo taageerada guriyeynta
- gargaar cunto
- adeegyada daryeelka bulshada, oo ay ku jiraan caafimaadka dhimirka, balwada ay adag tahay inaad goyso, iyo taageerada naafada
- taageerooyinka bulshada ee dhisa isku xidhka bulshada

- Isku duwaha daryeelka ayaa kaa caawin doona inay kuu qorsheeyaan ballamaha waxayna kaloo kaa taageeri doonaan sidii aad u dhisi lahayd aqoontaada iyo xirfadahaaga si aad u maamusho caafimaadkaaga iyo ladnaantaada barnaamijka ka dib.
- Iskuduwaha daryeelka ayaa si dhow ula shaqayn doona dhakhtarkaaga guud kaas oo sii wadi doona inaad ugu tagto wixii la xiriira daryeelka bukaan-socodka.
- Adeegyada waxaa loo heli karaa qaab ka fool-ka fool ah ama qaab aad ka fogtahay oo dhanka taleefanka/shaashada ah.



Qiimaha iyo muddada

Diabetes Connect waa **lacag la'aan** barnaamij ah, oo aysan wax kharash ah kaaga baxaynin ka qeybgalistiisu. *

Barnaamijku wuxuu socon doonaa illaa Juun 2025, si kastaba ha ahaatee muddada aad ku sii jirayso barnaamijka waxay ku xirnaan doontaa duruufahaaga gaarka ah.

* Diabetes Connect waxaa maalgeliya Dawlada Barwaaqa Sooranka (Commonwealth Government) taasoo qayb ka ah hindisaha Tijaabada Daryeelka Aasaasiga ah.

Xogta aan la shaacin ee ku saabsan ka qaybqaadashadaada tijaabada waxaa lala wadaagi doonaa Waaxda Caafimaadka ee Victoria iyo Dawlada Dhexe iyadoo ujeedaduna ay tahay kormeerid iyo wargelin.

Si aad ugu hesho dukumeentigan qaab kale [iimayl u dir kooxda mashruuca ee Diabetes Connect](#) <partnerships.primary@health.vic.gov.au>.

Authorised and published by the Victorian Government, 1 Treasury Place, Melbourne.

© State of Victoria, Australia, Department of Health, March 2024.

ISBN/ISSN 978-1-76131-554-1 (online/PDF/Word) or (print)

Waxaa laga heli karaa [Waaxda Caafimaadka Daryeelkeeda Isku-dhafka Ah](#)

<<https://www.health.vic.gov.au/primary-and-community-health/integrated-care>>



Australian Government



Department
of Health